QEYBTA 11/29/21

**HESHIISKA MASUULIYADA MAALIYADEED EE SANADLAHA AH**

**Waxaan si buuxda u fahmay oo aan u ogalaaday ogolaanshahayga ah aan isku qoro oo aan usii wado diwaangalinta koorasyada Milwaukee Area Technical College ("MATC") waxay si cad ugu xidhan tahay aqbalaada shuruudaha iyo xeerarka hoos ku xusan. Badalka fursada isqorista MATC, si aad u hesho adeegyo waxbarasho, iyo tixgalinaha kale ee qiimaha leh, Waxaan ogolahay shuruudaha iyo xeerarka soo socda.**

**TILMAAMO**

**Fadlan xullo khaanada wada sheekaysiga oo guji badhanka "Waan Aqbalay" ("I Accept") ee dhamaadka heshiiskan si aad u muujiso aqbalaadaada shuruudahan iyo xeerarkan, bayaanka khaanada ku xiga, iyo macluumaadka lagu siiyay ee linkiyada macluumaadka dheeraadka ah ee uu ka koobanyahay heshiiskani.**

**LACAG BIXINTA DUGSIGA/BALANQAADKA AY TAHAY IN LA BIXIYO**

Adigoo iska diwaangalinaya fasal kasta ama helaya adeeg kasta oo kaaga imanaya **Milwaukee Area Technical College** Waxaan aqbalay masuuliyad dhamaystiran oo ah inaan bixinayo dhamaan fiiga galitaanka, fiiga caadiga ah iyo kharashaadka kale ee la xidhiidha taasoo kasoo baxday diwaangalinta iyo/ama risiidhada adeegyada. Waxaan fahmay oo aan ogolaaday in diwaangalintayda iyo aqbalaada heshiisyadani ay ka dhalanayso heshiis qoraal balanqaad ah (waajibaadka maaliyadeed kaasoo ah nidaamka daynta waxbarashada, sida uu qeexayo Xeerka Kicitaanka Maraykanka 11 U.S.C. §523(a)(8)) kaasoo MATC waxay i siinaysaa adeegyo waxbarasho oo dib u dhigaya qayb ama dhammaan waajibaadka lacag bixinta ee adeegyadaas, waxaanan ballan qaadayaa inaan bixiyo dhammaan kharashka waxbarashada la qiimeeyay, fiiga iyo kharashyada kale ee la xidhiidha taariikhda la daabacay ama la cayimay. Waxaan fahmay oo aan ogolaaday in hadii aan ka baxo (ama "qaybinta" badh ahaan ama guud ahaan fasalada aan isdiwaangaliyay, Waxaan masuul ka noqon doonaa dhamaan ama qayb kamid ah fiiga diwaangalinta iyo fiiga caadiga ah marka loo eego jadwalka dib u bixinta Jadwalka lacag celinta ka noqoshada la daabacay ee lagu soo dhejiyay [Boga Racfaanka iyo Kabixista] iyo/ama siyaasad kasta oo u gaar ah barnaamijkayaga ama qaybta, kaasoo aan masuul ka ahay dib u eegista iyo fahanka.

Waxaan akhriyay shuruudaha iyo xeerarka jadwalka lacag celinta ee la daabacay iyo fahamka xeerarkan waxa lagu daray heshiiskan ee ku xusan tixraacan. Waxaan sidoo kale fahmay in ku guuldaraysigayga inaan soo xaadiro fasalka ama aan helo biil aanan anigu masuuliyadayda maaliyadeed sida kor lagu qeexay.

## Lacag-bixinta Ilaha kale ee Maalgelinta

Waxaan fahamsanahay haddii aan haysto wakaalad dibadda ah ama il maalgelin bixinaya kharashka waxbarashadayda iyo wixii kale oo kharashaad ah ee MATC, Waxaan weli masuul ka ahaan doonaa dhammaan kharashaad ka haddii aan ku guuldaraysto

shuruudaha lagu helo lacagaha. Wakaaladaha dibadda waxaa ku jira laakiin aanse lagu koobin kaalmada maaliyadeed ee fadaraalka, dugsiyada sare iyo dugsiyada degmooyinka, kafaala-qaadayaasha qolo saddexaad, shaqaalaha, faa'idooyinka waxbarashada Askarta-hawlgabka iyo wakaalado kale. Hadii mid ka mid ah wakaaladahaan ay bixinayaan, wali waa inaad saxeexdo warqadan oo marka lacag bixinta la helo, haraagaaga waxa la dhimi doonaa inta ay wakaaladu ogolaatay.

**Waan aqriyay oo waan aqbalay oo fahmay dhammaan shuruucda iyo macluumaadka ku jira Ka noqoshada iyo boga racfaanka iyo goobta xisaabinta ardayda .**

**XISAABTA HABSAANTAY/URURTAY**

Waxaan fahmay oo aan ogolaaday in haddii aan ku guul daraysto inaan bixiyo biilka xisaabta ardeygayga ama lacago kale oo ay leedahay iyo MATC taariikhda la qorsheeyey, MATC waxay haysan kartaa maaliyada iyo/ama qiimeyn kartaa khidmadaha habsaamay ee xisaabtay. Fadlan kala xidhiidh Xisaabaadka Ardeyga 414-297- 6797 ama saccounts@matc.edu wixii macluumaad dheeriya.

Waxaan fahmay in, haddii aan bixin waayo biilka xisaabta ardeygayga ama lacago kale oo ay leedahay MATC taariikhda la qorsheeyey, oo aan sameyn waayo diyaarin lacag bixin la aqbali karo si aan u keeno xisaabtayda imika, MATC waxay u gudbin kartaa xisaabtayda habsaantay gacan saddexaad, taasoo noqon karta shirkad dayn ururin ah ama qareen.

Waxaan sii fahmayn in haddii MATC u gudbiso xisaabta ardeygayga ku hadhsan gacan saddexaad oo sooo ururisa, khidmada soo ururinta waa la qiimeyn doonaa waxaana laga jari doonaa wakhtiga gudbinta ee gacanta saddexaad. Khidmada soo ururinta waxa lagu xisaabin doonaa xadiga hadhaaga xisaabta, ilaa heerka ugu sareeya ee sharcigu ogol yahay. Haddii dacwad la sameeyo si loo daboolo hadhaaga, waxaan fahmay inaan sidoo kale masuul ka noqon doono kharashaadka la xidhiidha dacwada sida kharashka maxkamada. Waxaan sidoo kale fahmay in xisaabtayda habsaantay loo gudbin karo mid ama inkabadan oo xafiisyada daynta qaranka ah.

**Xidhiidhka**

Waxaan fahmay oo aan ogolaaday in MATC isticmaashaa iimaylka ardayga (gmail) iyo fariin iyadoo mareysa Adeega-Iskaa ee MATC hab rasmiya oo la igalasoo xidhiidhi kro, iyo in anigu, sidaas darteed, masuul aan ka ahay akhrinta iimaylada iyo fariimaha aan ka helo MATC wakhti kasta. Waxaan u ogolaaday MATC iyo wakaaladeheeda iyo qandaraaslayaasheedu inay igalasoo xidhiidhaan aniga lambarada tilifoonkayga gacanta hada ama mustaqbalka, ciwaanka iimaylka, xisaabtayda MATC, ama aalad kale oo bilaa khad ah wixii khuseeya xisaabta daynta ardeygayga ee habsaantay, dayn kastoo kale oo ay igu leedahay MATC, ama macluumaadka guud ee aan ka helo MATC. Waxaan u ogolaaday MATC iyo wakaaladeheeda iyo qandaraaslayaasheedu inay isticmaalaan qalabka tilifoon wicida, codka macmalka ah ama horey loo duubay ama fariimo

qoraala, iyo wicitaanada iyo iimaylada gaarka ah, dadaalkooda inay ilasoo xidhiidhaan aniga. Haseyeeshee, waxaan fahmay inaan kala noqon karo ogolaanshahayga inaan waco tilifoonkayga gacanta anoo isticmaalaaya qalab tilifoon wicitaan una qoraaya Xisaabta Ardeygayga 414-297-6797 ama saccounts@matc.edu. Waxaan fahmay oo aan ogolaaday inaan masuul ka ahay inaan ku cusbooneysiiyo diwaanka MATC ciwaankayga hada, ciwaanka iimaylkayga, iyo lambarada tilifoonada. Isbadellada waxa laga sameyn karaa Adeega Iskaa ee MATC iyadoo la gujinaayo Isbadelka Ciwaanka ee Adeegyada iyo Linkiga. Markaan uga tago MATC sabab uun, waxaan fahmay inay tahay masuuliyadayda inaan siiyo MATC macluumaadka xidhiidhkayga ee cusub si ay ilasoo saameeyaan xidhiidh khuseeya xadiga lacagta hadhsan ee ay igu leedahay MATC.

**FOOMKA IRS EE 1098-T**

Waxaan ogolaaday inaan siiyo lambarkayga Adeega Bulshada (SSN) ama lambar aqoonsi cashuur bixiye (TIN) MATC markay codsadaan sida uu dhigayo qanuunka Adeega Dakhliga Gudaha (IRS) ee Foomka 1098- T ujeedooyin warbixineed awgeed. Haddii aan ku guul daraysto inaan siiyo SSN kayga ama TIN kayga MATC waxaan ogolaaday inaan bixiyo midkasta iyo dhamaan ganaaxyada IRS ee la qiimeeyey natiijo ka dhalatay SSN/TIN kayga awgeed. Waxaan ogolaaday inaan ka helo Foomkayga 1098-T sanadlaha IRS ee elektarooniga ah MATC. Waxaan fahmay in haddii aanan ogolaan inaan ku helo Foomka 1098-T elektroonig ahaan, nuqul warqad ah ayaa la bixin doonaa. Waxaan fahamsanahay in MATC  ay isiin doonto foomkeyga sanadlaha ah ee 1098-T si elektaroonig ah iyada oo la adeegsanaayo is-gaarsiinta.

**KALA DUWANAANSHA**

Waxaan fahmay oo aan ogolaaday in haddii aan ka yar ahay da'da sharciga ee inta badan (guud ahaan, 18) markaan fulinaayo heshiiskan, in adeegyada waxbarasho ee ay bixiso MATC ay daruuri yihiin ama adeegyo muhiim ah, oo aan sidaas darteed hehshiis ahan masuul ka ahay heshiiskan. Heshiiskani wuxuu badelayaa isfahm hore oo kasta, matalaada ama xidhiidh u dhaxeeya aniga iyo MATC oo khuseeya shuruudaha khaaska ah iyo xeerarka lagu sheegay heshiiskan, oo lama badeli karo ama mana saameyn karo waxkastoo la tacaalida ama mudada hawsha ah. Heshiiskani waxaa badeli kara MATC haddii wax ka badelka aan saxeexo anigu (elektaroonig ahaan ama si kale). Haddii shuruucda heshiiskan, ama xadi kale oo lagu leeyahay heshiiskan, la go'aamiyo inuu yahay sharci daro ama aan la dhaqangalin karin, shuruucda hadhsan ee heshiisku way sii ansaxaysaa wayna dhaqangalaysaa ilaa heerka sharcigu ogol yahay. Heshiiskani iyo hawlaha heshiiskani qabanayo waxa xukumaya shuruucda Gobolka Wisconsin, iyadoonay saameyn qawaaniintiisa khilaafka sharciga, oo ana waxaan ogolaaday in maxkmadaha gobolka iyo fadaraalka ee ku yaal Degmada Milwaukee, Wisconsin ay xukumi doonaan si ay u xaliyaan khilaafka kasoo baxa heshiiskan. Heshiiskani wuxuu si buuxda u dhaqangalayaa oo shaqeynayaa ilaa iyo inta aan ka diwaangashanahay fasalka kasta ama barnaamij MATC, iyo intaas ka dib ilaa inta ay lacag igu leedahay MATC. Waxaan fahmay in koolejkaygu uhogaansamaayo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Asturnaanta (FERPA) ee Waaxda Waxbarashada Mareykanka.

Anoo ka xullanaya "Aqbal" (“Accept”) Adeega Iskaa, waxaan fahmay oo aan ogolaaday in aan saxeexaayo heshiiskan elektaroonig ahaan oo saxeexayga elektarooniga ah yahay sharci u dhigma saxeexayga gacanta ee heshiiskan hoos imanaya sharciga gobolka Wisconsin. Waxaan fahmay oo aan ogolaaday in saxeexayga elektarooniga ee kasoo muuqanaaya heshiiskan uu la mid yahay saxeexayga gacanta sababo saxnaan, dhaqangalin iyo aqbalaad awgeed. Waxaan fahmay badhanka "Isdiwaangali" ee Adeega Iskaa in aan la heli karin ilaa aan aqbalasho heshiiska.